

# Waraaqda Xaqiiqooyinka Xeerkka Cuntada #3

Waxa loo baa han yahay in aad ka ogaa to Xeerkka

WWW.HEALTHOREGON.ORG  
/FOODSAFETY

## OAR 333-150-0000, CUTUBKA 3-502.11

Shirkadda cuntadu waa in ay kala duwanaanshaha (variance) ka heshaa wakaaladda maamulka sida ku cad

§ 8103.10 iyo § 8-103.11 kahor; <sup>PF</sup>  
(A) Qiiqinta cuntada ayada oo loo isticmaalayo qaab cuntada lagu kaydi-nayo halkii loo isticmaali laaha qaab sare u qaadidda dhadhanka ah; <sup>PF</sup>

(B) Daaweynta cuntada; <sup>PF</sup>

(C) Iisticmaalka waxyaabaha cuntada lagu daro ama ku daridda waxyaabaha sida khalka; <sup>PF</sup>

(1) Si loogu isticmaalayo qaab cuntada lagu kaydinayo halkii loo isticmaali laaha sare u qaadidda dhadhanka; <sup>PF</sup> ama

(2) Si loo bixiyo cunto si aysan u noqon mid ay suuragal tahay inay khatar badan tahay; <sup>PF</sup>

(D) Seejalidda cuntada ayada oo la isticmaalayo qaabka seejalidda oksjijinka la yareeyay marka laga reebu meel koritaanka iyo aburmidda sunta ay keenayso Clostridium botulinum iyo koritaanka Listeria monocytogenes lagu xakameeyo sida ku cad § 3-502.12; <sup>PF</sup>

(E) Ku shaqaynta haanta lagu soo bandhigo hanaanka nolosha ka caawiya xayaawanka badda ku nool ee qolofta leh ee molluscan oo loo isticmaalo in lagu kaydiyo ama lagu soo bandhigo xayaawanka badda ku nool ee qolofta leh ee dadka la siyo si ay u cunaan; <sup>PF</sup>

(F) Xayaawanka gaar ahaanta loo diyaariyku kuwaas oo loogu tala galay isticmaalka shahsiga cunto ahaan aanna loogu tala galin in la iibyo ama adeeg ahaan shirkadda cuntada dheddeed; <sup>PF</sup>

(G) U diyaarinta cuntada qaab kale taasoo ay go'aminayso wakaaladda maamulki si ay amraan kala duwanaanshaha (variance); <sup>PF</sup> ama

(H) Iniiyaha ama digirta curdanka curdanka ah. <sup>PF</sup>

## SABABAHA LA XIRIIRA CAAFIMAADKA BULSHADA:

Hanaanada cuntada ee gaarka ah kuwaasoo u baahan kala duwanaanshiyo (variance) waxay markii taariikhyan la eego sababeen xanuno badan oo cuntada ka dhasha marka loo bardhigo hanaanada caadiga ah. Howlaha noocaan ah waxay qofka ka mas'uulka ah iyo shaqaalaha cuntada uga baahan karaan in ay isticmaalaan qalab u gaar ah ayna muujiyaan xirfadlenimo gaar ah. Shuruudda ka duwanaanshaha (variance) waxaa loo qaabeevay in lagu xaqiijyo in qaabka la soo jeediay ee loo howlgayo loo sameeyo si nabadgalo ah.

Maqaaxiyuhu waa kuwo si joogto ah isu badalaya tijaabinayana qaabab kala duwan oo karinta iyo diyaarinta cuntada ah oo ay ugu tala galeen macaamiishooda. Arintaan waxaa kamid noqon kara xirfadaha diyaarinta cuntada kuwaas oo aan buuxi-nayn Shuruucda Fayadhowrka Cuntada.

Ayada oo ay sabab u tahay khata-raha la xiriira cuntooyinka iyo ha-naanada qaar, maqaaxiyuhu waa in ay isticmaalaan hanaan kala duwanaansho kahor inta aysan bilaabin diyaarin gaar ah sida ku cad OAR 333-150-0000 Cutubka 3-502.11.

Hanaanadaanu waxay keenaan khatar caafimaad oo weyn had-dii goobtu aysan raacin ha-naanada shaqada ee gaarka ah markasta oo ay wax soosaar diyaarinayso.

Qaar kamid ah tusaalooyinku waa:

- Ku daaweynta nitrate
- Qiiqinta cuntada si loo kaydiyo
- Cuntooyinka la kariyay ee hawada la'aanta lagu seejalay
- Aysiidhinta cuntooyinka
- Iniiyaha ama digirta curdanka ah ee goobta ku taala

Waxaan haynaa macluumaad laga heli karo: <http://public.health.oregon.gov/HealthyEnvironments/FoodSafety/Pages/variance.aspx>

si ay howlwadeenada uga caawiso in ay helaan macluumaad dheeraad ah ayna bilaabaan iyaga oo maraya hanaanka kala duwidda.

Maskaxda ku hay in kala duwanaanshaha aan loogu tala galin goobaha aan buuxin shuruucda. Waxa loogu talagalay goobaha muujin kara in shuruucda ay culays aysan xamili karin ku keenayaan howlahooda iyo in waxa badalka u noqon kara shuruueda ee ay soojeed-iyeen ay keenayaan difaac caafimaadka bulshada ah oo u dhig-ma ama ka sareeya talaabooyinka ay shuruucda hadda jiraan dhigayaan.



***Hilibka googo'an ee la qalajiyay la-na huuriyay ayaa ah hal nooc oo daaweynta hilibka ah kaasoo u baa-han kara kala duwanaansho***

**Dhammaan codsiyada kala duwidda waa in la aqbalaa kahor inta aan hanaanka la isticmaalin.**

**Kharashka codsiga kala duwiddu (variance) waa \$500 halkii hanaan**